

Light Reading

Janaayo/Febaraayo 2021

KA JAAJAREYSO XARUNTA JAAJAREYNATA GAWAARIGA KORONTADA KU SHAQEEYA EE CITY LIGHT EV

City Light waxay dhawaan dhowr xarumood oo lagu jaajareeyo gawaarida korontada ku shaqeeya (EV) ka furday Seattle iyo Tukwila. Waxaan xarumo ay isticmaali karaan dadweynaha ka sameeynaynaa guud ahaan aagga adeegga korontada si loo daboolo baahiyaha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee macaamiisha dooranaaya inay baahidooda tamarta gaadiidka ay kaga shidaal qaataan tamarteenada nadiifka ah.

Qalabka iyo Goobta Jaajareynta

Isgoyska Alaska: 2 xarumood oo lagu jaajareeyo Gawaarida Korontada Kushaqeeya

Beacon Hill: 2 xarumood oo lagu jaajareeyo Gawaarida Korontada Kushaqeeya

Madison-Miller: 2 xarumood oo lagu jaajareeyo Gawaarida Korontada Kushaqeeya

Magnuson Park: 2 xarumood oo lagu jaajareeyo Gawaarida Korontada Kushaqeeya

Xarunta Adeegga Konfureed ee Seattle City Light 4 xarumood oo lagu jaajareeyo Gawaarida Korontada Kushaqeeya, 2 jaajar oo heerka 2 aad ah

Tukwila: 4 xarumood oo lagu jaajareeyo Gawaarida Korontada Kushaqeeya, 1 jaajar oo heerka 2 aad ah

Hindisaadani waxay qayb ka tahay ballanqaadka City Light ee ah inay bixiso xalalka koronto siinta gaadiidka ee diiradda lagu saaraayo bulshada kuwaas oo loogu talagalay in lagu daboolo baahiyaha macaamiisheenna, laguna yareeyo qiiga kaarboonka iyo wasakheynta hawada iyo in natiijooyin loogu raadiyo shabakadeena.

Iyadoo ay kuxirantahay gaariga korontada ku shaqeeya, fiilooyinka jaajaraga waxay qeybin karaan tamar illaa 90 mayl ku gaarsiin karta nuskii-saac oo waqtiga jaajareynta ahba, halka jaajarayaasha heerka 2-aad ah ay bixin karaan tamar ilaa 30 mayl ku gaarsiin karta halkii saacad oo wakhtiga jaajareynta ahba.

Xarumahan jaajareynta iyo kuwo kale oo badan ayaa la heli karaa si ay dadweynaha u isticmaalaan waxaana laga heli karaa ablikeeshinka jaajareynta Gawaarida Korontada Kushaqeeya ee PlugShare ama webseetkooda ee ah [plugshare.com](https://www.plugshare.com). Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo energysolutions.seattle.gov/electric-vehicles ama iimayl noogu soo dir SCL_ElectricVehicles@seattle.gov.

Waxaan la shaqeyneynaa hay'adaha iskaashiga la leenahay si loo aqoonsado xarumaha jaajareynta Gawaarida Korontada Kushaqeeya ee mustaqbalka. Inbadan ayaa dhawaan lagu dhawaaqi doonaa ee la soco!

Gargaarka Maaliyadeed Inta Lagu Jiro Waqtigaan Caqabada Badan

Bilaha jiilaalka waxay sababi karaan in la isticmaalo koranto badan iyo, midaasna waxay keenaysaa, inay biilasha ku bataan macaamiisha qaarkood. Markii lagu daro joogitaanka guriga sababo la xiriira cudurka COVID-19, waxay sidoo kale kordhin kartaa isticmaalkaaga tamarta.

Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah barnaamijyada gargaarka maaliyadeed ee laga heli karo City Light si gacan loogaga geysto yareynta culeyska xilligan.

Low Income Energy Assistance Program (LIHEAP, Barnaamijka Gargaarka Tamarta Dakhliga Hoose)

Dowladda federaalku waxay gacan ka geysataa bixinta biilasha iyo sidoo kale kala-talinta miisaaniyadda iyo adeegyada cimilada. Iyada oo kuxiran meesha aad ku nooshahay, waxaad khadka tooska ah ama taleefan iskaga diiwaangelin kartaa LIHEAP adigoo caawimaad ka helaaya hay'adaha maxalliga ah. Booqo seattle.gov/light/assistance si aad u aragto heerka u qalmitaankaaga.

UTILITY DISCOUNT PROGRAM (BARNAAMIJKA QIIMO DHIMISTA ADEEGYADA GURIGA)

Adeegyada Guriga ee Dadwaynaha Seattle iyo Seattle City Light waxay sameeyeen foomka is-caddeynta Barnaamijka Qiimo Dhimista Adeegyada Guriga kaas oo loogu talagalay macaamiisha u-qalma dakhli ahaan, taas oo dedejineysa hanaanka diiwaangelinta. Macaamiisha u qalma dakhli ahaan waxay helayaan qiimo dhimis 60% ah ee biilashooda City Light iyo qiimo dhimis 50% ah ee biilashooda Adeegyada Guriga ee Dadwaynaha Seattle (Seattle Public Utilities). Si aad u ogaato haddii aad tahay macaamiil degaanka degan oo dakhli ahaan u qalma barnaamijka, booqo seattle.gov/UDP.

Qorshayaasha lacag Bixinta

Macaamiisha Seattle City Light waxay hadda bilaabi karaan qorsho lacag bixineed ka dib markay galaan akoonka ay ku leeyihiin bogga adeegga korantada. Waxaad dooran kartaa inaad bixiso biilka korontada laba-toddobaad kasta ama bil kasta, taariikhda lacag bixintaada ugu horreysa, muddada lacag-bixinta iyo dibaajiga koowaad marka aad samaynaysid qorshahaaga. Waxaad heli doontaa iimayl ay ku qoran yihiin faahfaahinta qorshahaaga lacag bixineed mar haddii hawsha saameynta akoonka ay dhammaato. Akoon ka samayso webseetka adeegyada korontada myutilities.seattle.gov maanta!

Waa xilli duufaaneed. Diyaar ma tahay?

Waqtiga ay qaadato in si amaan ah loogu soo celiyo korontada inta lagu guda jiro go'itaanka korontada way kala duwanaan kartaa. Diyaar garow yar oo maanta la sameeyo ayaa qeyb weyn ka qaadan kara adiga iyo qoyskaagaba berrito inaad nabad iyo raaxo ku joogtaan. Booqo powerlines.seattle.gov/outage si aad u hesho tallooyin kaa caawinaya inaad u diyaar garowdo.

La Heli Doono Goordhow: Bilow/Jooji/Wareeji Adeegyada Adigoo isticmaalaya Webseetka Adeegga Korontada

Waxaan codsiga bilaabida/joojinta/wareejinta adeegga ku daraynaa webseetka adeegyada korontada. La soco wixii warbixin ah ee soo kordha goor dhow!

Ka Shaqeynayo Aaga Xaafadaada

Kooxda Seattle City Light waxay joogaan xaafadahaan, ayagoo kashaqaynaaya bixinta adeegyo waxtar leh:

- Arroyo/South Arbor Heights: rakibaada fiillooyin dhulka hoostiisa, saqafyada iyo nalalka wadooyinka si loo badelo kaabayaasha duugoobey.
- Aagga Adeegga: waxaan baalayaasha korontada ee duugoobey ka bedelaynaa dhammaan aagga adeegga korontada si aan kor ugu qaadno badqabka iyo isku halaynta korontada.

Kan waa liis aan dhamaystirneen. Haddii aad rabto faahfaafin booqo seattle.gov/light/atwork si aad u aragto khariiradeena aadna waxbadan uga barato mashaariicda gaarka ah.

Tallada badbaadada ee goobta

"Boorsada/qalabka gurmada degdega ah oo si fiican loo qalabeeyay ku hayso gurigaaga ama gaarigaaga. Xaqiiji inay fududahay in la helo, sidoo kale!"

Su'aalo, faallooyin ama Soojeedino? Iimayl noogu soo dir SCL_CommOutreach@seattle.gov